

Unofficial translation

Bayaan ka soo baxay Ergayga Gaarka ah ee Midowga Yurub, Michele Cervone d'Urso kuna aadan weerarki lagu qaaday Aqalka Madaxtooyada ee Muqdisho, Soomaaliya

Ergayga Gaarka ah ee Midowga Yurub, Michele Cervone d'Urso, wuxuu cambaareyey weerarkii argagaxisada ee habeen hore lagu qaaday Villa Soomaaliya wuxuuna u tacsiyadeeyey dadki ay waxyeeladu ka soo gaartay iyo qoysaskooda. Ciidamada nabadgelyada Soomaaliyeed iyo AMISOM ayaa waxay uga jawaabeen si dhaqsi ah iyo geesinnima ah.

Ergaygu wuxuu yiri *"Waxaan aad uga naxay weerarkan foosha xun ee dhacay bisha nabadda ee ramadaanee barakaysan. Waxaan qadarinayaa kuwi ku naf waayey ayagoo difaacaya Hogaanka Federaalka waxaana ku baaqayaa baaris buuxda ee weerarkan."*

Midowga Yurub wuxuu sii wadayaa taaryeeradiisa balaaran ee uu u fidinaayo shacabka Soomaaliya dadaalkooda ay uga soo kabanayaan sanooyin colaad iyo rafaad. Falalaka noocaan ah ee fulinimada ah looma dul qaadan doono kuwa ka masuul ahne waa in cadaaladda la hor keenaa.



Delegation of the European Union to Somalia
P.O. Box 45119 Nairobi | Insurance House, Ragati Road, Upper Hill
Tel.: +254 (0)20 280 20 00
Email: SOMALIAMISSION@eeas.europa.eu
Website: <http://www.eu-somalia.eu>
Twitter: [@SomaliaEU](https://twitter.com/SomaliaEU) | Flickr: [EUSomalia](https://www.flickr.com/photos/eusomalia/) | Youtube: [EU SOMALIA](https://www.youtube.com/channel/UCQmKvZvZvZvZvZvZvZvZvZv)